


**Su'aalaha badanaa ay iswaydiinayaan qoysasku**

**Waa maxay Sahanka Iskuulada Guuleystay Sanad-Dugsiyeedka 2019-20 ee Dugsiyada Dadweynaha Portland?**

Sahanka Iskuulada Guuleystay wuxuu qoysaska siinayaan fursad ay kula wadaagaan sida uu xaalka iskuulka ardaydoodu yahay. Maamulka Dugisyada Dadweynaha Portland, maamulayaasha iyo macallimiintu waxa ay iguna ka helaan daah-furnaan, macluumaad dhammeystiran oo ku saabsan waayo-aragnimada dhammaan qoysaska iskuuladeenu .

**Waa ayo cida sahanka qaadaneysaa?**

Sahanka waxa qaadanaya ardayda fasalada 4aad,5aad,6aad,7aad ilaa fasalka10naad iyaga oo lagu weydiinayo waayo-aragnimadooda fasaladooda, iskuulada iyo waliba aragtida waalidiinta ee ku wajahan iskuulada ay caruurtoodu wax ka barato.

**Waa ayo cida sahankani qaadaysaa?**

Sannadka-dugsiyeedka 2019-20, Dugsiyada Dadweynaha Portland oo iskaashi la sameynaya Panorama Education waxa ay ururinayaa xogta ardayda iyo qoysaska taasi oo naga caawin doonta sidii aanu kor ugu qaadi lahayn waayo-aragnimada dhamman ardayda dugsiyada degmada wax ka barata. Panorama waxa ay caawin doontaa Dugsiyada Dadweynaha Portland inay si degdeg ah u soo gaadhsiiyaan natiijooyinka, iyaga oo siinaya shaqaalaha dugsiyada degmada tababaro sidii ay u isticmaali lahaayeen natiijooyinkaasi in lagu horumariyo. Panorama waxa ay sidoo kale addeeg siin doonaan dugsiyada degmada ee wadanka oo dhan, sidaas awgeed waxa aynu fursad u heli doonaa in aan isbarbar dhigno natiijooyinkeena iyo kuwa kale ee ka soo baxa degmooyinka kale. Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan Panorama, waxaad booqataa shabakadani: https://www.panoramaed.com..

**Maxaa ka mid ah mawduucyada lagu soo qaadanayo sahankani?**

Sahankani waxa lagaga hadli doonaa mowduucyo ku saabsan dareenka lahaanshaha, amniga dugsiga, jawiga dugsiga, carqaladaha hortaagan ka qeybqaadashada qoyska, iyo sidoo kale sida ardaydu ay uga fikirayaan una dareemayaan kala duwanaanshaha, sinnaanta, iyo inay ka mid yihiin ardayda dugsiga.

**Goorma ayaa sahanka la qaadanayaa?**

Taariikhda sahankan la bilaabayaa waxaa loo suntay bisha Janaayo 27keeda. Waxa sidoo kale loo mudooyey jadwalka ardaydu qaadanayso inuu furan yahay ilaa bisha Febraayo 14keeda, iyada oo qoysasku sahankan iyagana uu u furan yahay ilaa bisha Febraayo 28keeda.

**Sidee ayaan u qaadan karaan sahanka?**

- Qoysaska: Qoysasku waxa ay sahanka ka qaadan karaan online dhinaca internet-ka ah. Marka uu furmo sahanka, xubin kasta ee qoyska Dugsiyada Dadweynaha Portland ahi wuxuu heli doonaa email iyo xaashi yar oo ogeysiis ah oo kaaga iman doonta iskuulka ardaygaagu wax ka barto. Sahanka oo ku qoran xaashi laguna turjumay shanta luqadood ee Dugsiyada Dadweynaha Portland caawiyaan waxaad ku heli kartaa luqadaha: Isbaanishka, Ruushka, Shiinaha, Soomaaliga iyo Fiitnaamiiska.
- Ardayda: Dhammaan ardaydu waxa ay sahanka ku qaadan doonaan online waqtiga ay maalintii iskuulka wax ka baranayaan. Macallimiinta fasaladu waxay ay ardayda siin doonaa waqti ay ardaydu ku qaataan sahanka qalabkii ay ku qaadan lahaayeen.
- Shaqaalaha waxa ay heli doonaan email uu la socdo sahanku.

**Waxa aan rabaa in aan ka qeybqaato, laakiin waxa aan ka welwelsanahay waxyaabaha aniga ii gaarka ah iyo in sahanku noqonayo qarsoodi. Waa maxay shuruudaha heshiiska iyo siyaasada wixii gaar kuu ah lagu ilaalinayo, iwm?**

- Sahanku waa qarsoodi iyada oo aanu ku qorneyn fasalada, ardayda, macalimiinta ama xubnaha qoysku.
- Ardayda lama weydiinayo aqoonsigooda ardaynimo(ID) iyo xogta buug-yaraha laguma wadaagi doono qayb ka mid ah sahankani. Natiijooyinka sahanka ka soo baxa ee shakhsiyaadka cidna looma gudbin doono ama lama wargalin doono qof ka mid ah gudaha ama dibadda Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) iyo Panorama iyada oo aan fasax laga haysan qofkii sahanka qaatay.

**Khasab miyaa in ardaydu qaadato sahanka?**

Dhamaan ardayda fasaladda 4aad, 5aad, 7aad, 8aad, 9aad iyo 10naad waxaa la siinayaa fursad ay ku qaataan sahanka inta ay iskuulka maalintii joogaan. Si kastaba ha ahaatee, iyaga ayey jirtaa in ay qaataan sahanka iyo in kale. Haddii ardaygu aanu rabin inuu ka qeybqaato sahanka marka la siiyo fursad uu ku qaato wuu diidi karaa. Waqtiga uu sahanka ardaygu qaadanayaa ugu yaraan waa inta u dhaxaysa 10-15 daqiiqo.

**Oggolaansho miyaa la weydiisanayaa qoysaska sidii ay caruurtoodu u qaadan lahayd sahanka? Ka waran haddii aanan rabin in ilmaheygu qaato sahanka?**

Qoysasku waxa ay heli doonaa xiriir ku saabsan sahanka marka uu soo dhow yahay, iyada oo aan sahanka ku soo qori doono boggeena sidii aad u sii fiirin lahayd inta aan la bilaabi sahanka. Ujeedadda natiijooyinka ka soo baxa waxa kaliya oo loo isticmali doonaa sidii waxbarashada caruurta kor loogu qaadi lahaa. Dhammaan iskuulada waxa ay sahanka siin doonaa sidii ay u qaadan lahaayeen ardayda fasalada 5aad, 7aad iyo 10naad, laakiin haddii ay waalidiintu rabin in ilmahoodu dhammaystiro ama ilmuhu aanu rabin in uu dhammeystiro sahanka, ardaydu waa ay diidi karaan.Waaxda Waxqabadka iyo Qorsheynta Nidaamka Dugsiyada Dadweynaha Portland(PPS) waxa ay siin doontaa tilmaamaha sida loo qaadanayo sahanka macallimiinta/xiriiriyaasha sahanka ee iskuul kasta oo halkan lagu sheegay.

**Waa maxay sababta loo doortay kaliya inay sahanka qaataan fasalada, 5aad, 7aad, 8aad, 9aad, 10naad ?**

Sahaminta lagu sameynayo heerka fasaladani waxa ay naga caawin doontaa sidii aan u fahmi lahayn waayo-aragnimada ardayda dugsiyada hoose, dhexe iyo dugsiyadda sarre. Sahaminta lagu sameynayo heerka fasaladani waxa kaliya ay hoos u dhigi doontaa culeyska ardayda saaran iyo iskuulada, laakiin wali waxa ay noqonayaan muunad matasha sida ay u dhan yihiin Dugsiyada Dadweynaha Portland.

**Haddii ilmahaygu aanu ahayn fasalada 4aad, 5aad, 7aad, 8aad, 9aad ama 10naad, miyaan qaadan karaa sahanka? Miyaan sahanka mar wax ka badan qaadan karaa haddii uu ilmaheygu wax ka barto iskuulo kal duwan ?**

Dhammaan qoysasku waa ay qaadan karaan sahanka fasalka ay doonaan ha ahaadaan ardaydoodiye. Xubnaha qoysasku waxa ay qaadan karaan hal mar sahanka iskuulka ay ilmahoodu wax ka bartaan. Tusaale ahaan, haddii xubin qoyska ahi ay leedahay arday dugsiga dhexe ah iyo labo arday oo dugsiga sarre ah, waxa ay qaadan doonaan hal sahan oo dugsiga hoose ah ee ardaygoodu wax ka barto, iyo hal sahan oo dugsiga sarre ee ilmahoodu wax ka barto.